RENTHELPMN

DIYAAR GAROW: KIREYSTAYAASHA

Ma uga baahantahay caawin lagu bixinayo kirada ama qarashaadka?

RentHelpMN dhawaan ayey imaaneysaa oo waxaa u suurtogeli karto inay ku caawiso. Halkaan waa sida loo diyaariyo codsashada.

Miyaan u qalmaa?

- ☐ Ma tahay kireyste ku nool Minnesota?
- ☐ Miyaad u qalantaa caymiska shaqo la'aanta? AMA, miyay si xun kuu saameysay COVID-19 si kastaba?
- ☐ Ma ogtahay daqliga sannadlaha oo dhammaan dadka weyn ee qoyskaaga ku jiro? (Waa inay buuxiyaan xadeynada daqliga, fiiri hoos)
- ☐ Ma leedahay kirada waqtigeeda dhaaftay?

Haddii aad ku jawaabtid haa oo dhammaan afarta su'aalood, waxaad u qalmeysaa inaad codsatid markii barnaamijka furmo.

Maxaan u baahannahay inaan codsado?

Usu keen dokumintiyadaan waqtigooda ka hor si loo fududeeyo dhameystirka codsigaaga. Waxaad ku xareyn kartaa sawirada mobeelka ama koobiyada la sawiray, ama soo wac 211 haddii aad caawin u baahantahay.

- ☐ **Magaca milkiilahaaga, ciwaanka iyo warbixinta xiriirka -** Waxaan u baahaneynaa inaan la xiriirno milkiilahaaga si u soo diro lacag bixinta oo u xaqiijiyo inuu yahay ciwaankaaga guud.
- ☐ **Koobiga heshiiskaaga iyo heshiiska kirada -** Haddii aysan aheyn heshiiska kirada, dokumintiga ka yimid milkiilahaaga ama milkiilaha muujinayo cadadka aad bixisid iyo/ama cadadka aad ka qabtid kirada. Waan bixin karnaa foom haddii loo baahdo.
- ☐ **Bayaanka kirada waqtigeeda la dhaafay (ama buuga) -** haddii aad dib uga dhacday kiradaada, isku day inaad ka heshid buugga ama bayaanka milkiilaha oo muujinayo inta iyo billahee aad weli ka qabtid kirada.
- ☐ **Liiska cida ku nool qoyskaaga -** Barnaamijkaan waxaa ku jiro qof walba ee ku nool halkaas maalinta aad codsatid. Intaas waxaa dheer dadka weyn iyo carruurta qoyska ku jiro, ee laga yaabo inay ku jiraan carruurta aan xanaanada aheyn, dadka aan ku jirin heshiiska kirada, xubnaha qoyska ee aad ku daryeeshid gurigaaga, carruurta aan dhalan iyo kuwa kale ee adiga kula nool hadeer. Dadka weyn ee aan la xiriirin (qol wadaaga) ee wada nool waxaa loo tixgeliyaa qoys. Ogow in dhammaan dadka weyn ee qoyska ku jiro ay tahay inay wadaagaan warbixintooda daqliga.
- ☐ **Dokumintiga Daqliga:**
  - ☐ 2020 Daqliga La canshuuri karo (1040s, 1099s ama W2s)
  - ☐ Rasiidyada Lacag bixinta ama cadeynta lacag bixinada kale (labo bilood)
- ☐ **Foomka aqoonsiga oo madaxa qoyska** – waxaan u baahaneynaa inaan xaqiijino inaad tahay cida aad tiri inaad tahay iyo gobolka sameeyay, Qabiilka ama aqoonsiga kale ee caalamiga ah.

Soo wac 211 haddii aadan haysan dokumintiga daqliga.

Ka waran biilasheyda korontada?

Si loo codsado caawinta biilashada qarashaadka ama qarashaadka kale, kuwaan diyaarso.

- ☐ Biilka korontada (gaaska kireystaha bixiyay, korontada, kululeynta, tamarta, biyaha ama siiwajka, ama qarashaadka kale)
- ☐ Ogeysiinta waqtiga dhaaftay ee ka imaaneyso shirkada korontada

MINNESOTA

Waa xeerka Guriyenya Minnesota ee guriyeynta cadaalad dheeraad ah ee la raacsanyahay oo dhammaan barnaamijyadeena si markaas shaqsiyaadka heerarka daqliga la midka ah ay leeyihiin helitaan simman ee Barnaamijyada Guriyeynta Minnesota, iyada oo aan laga eegin jinsiyada, midibka, caqiidada, diinta, asalka dhalashada, jinsiyada, heerka guurka, heerka la xiriiro caawinta dadweynaha, curyaannimada, heerka qoyska, aqoonsiga jisniga ama dooqa galmada

RENTHELPMN

Qarashaadkee ayaa lagu daboolayaa?

- **RentHelpMN** ayaa ku caawineyso kirada iyo qarashaadka oo illaa 15 bilood ee ka bilaabaneyso Abriil 1, 2020, iyo kordhinta suurtogalka ah ee ku saleysan baahida. **RentHelpMN** ayaa dabooli karto korontada waqtigeeda dhaafray, gaaska, adeegyada tamarta guriga, biyaha, siiwajka iyo ka saarida qashinka laakin ma daboosho taleefonka iyo adeegyada intarneetka.

Miyaan codsan karaa haddii aan helo caawinta kale ee kirada la xiriirto COVID?

- Codsadaha helo caawinta kale ee kirada la xiriirto COVID weli way u qalmaan barnaamijka **RentHelpMN**. **RentHelpMN** ma dabooli karaan kirada ama qarashaadka horaan u bixiyay barnaamij kale.

Sidee ayaan ku ogaadaa haddii daqligeyga u qalmo?

- **Daqligaaga waxaa ku jiri karo:** Mushaarada ka imaanayo shaqooyinka, iskii u shaqeysiga, taageerada carruurta, gunada garoobta, caymiska shaqo la'aanta, jeegaga lacagta, Daqliga Amniga Bulshada (SSI), howlgabka, qeybinada koontada shaqo ka fariisiga, daqliga maalgashiga la helay ama daqliga ganacsiga.

  U qalmida daqliga wuxuu ku saleysanyahay 80% ee daqliga dhexaadka ee aagaaga, oo waxay ku kala duwantahay gobol ahaan iyo tirada dadka ku jiro qoyska. Tusaale ahaan, qos 1-qof ah wuxuu u qalmayaa daqli ka hooseeyo $40,700 haddii ay ku noolyihiin Gobolka Aitkin, ama ka hooseeyo $54,950 haddii ay ku noolyihiin Caasimadaha Metro Twin. Qoyska 4 qof ah, wuxuu u qalmayaa daqli ka hooseeyo $58,100 ku nool Gobolka Aitkin ama ka hooseeyo $78,500 ku noolyihiin Metro.

  Daqligaaga wuxuu u badanyahay inuu u qalmo haddii aad heshid faa'idooyin kale ee loo heli karo kaliya dadka reer Minnesota ee daqliga hoose sida Kaararka Cuntada (SNAP), MFIP iyo GA, ama haddii aad ku nooshahay guri la goyn karo iyo daqligaaga uusan u kordhin si weyn tan iyo intaad u qalantay.

- **Daqliga La canshuuri karo 2020:** Haddii dhammaan dadka weyn (18+) ee ku jiro qoyska buuxiyaan canshuurtada 2020, midkood si wadajir ah ama shaqsi ahaan, dhammaan waxaad u baahantahay waa Foomamka 1040. Haddii aad leedahay bayaanada daqliga ee 2020 sida W-2s, 1099s, ama foomamka kale ee canshuurta laakin aadan weli xareynin, diyaarso kuwaas.
- **Rasiidyada Lacag bixinta:** Waad isticmaali kartaa labo bilood oo rasiidyada lacag bixinta ama dokumintiyada kale ee lacag bixinta ee muujinayo daqligaaga. Rasiidyada lacag bixinta si gaar ah ayay wax ku ool u yeelan kartaa haddii uu qof dhawaan guuray oo yareeyo daqliga qoyskaaga, ama haddii aad aragtay hoos u dhac weyn ee daqligaaga sabab la xiriirto cudurka safmarka COVID-19.
- **Is Xaqiijinta:** Xaaladaha xadidan ee laga yaabo inay kuu suurtogasho is xaqiijinta. Tani waxay u noqon kartaa iqtiyaar dhalinyarada qoyska ku jiro ee aan taariiq shaqo laheyn, wixii dadka weyn ee u hela daqliga kaliya kaash ahaan, ama dacwadaha meesha goobta shaqada xirantahay, oo aadan heli karin dokumintiga. Haddii aad leedahay shaqaalaha dacwada ee garanayo xaalada daqliga qoyskaaga, waxaa noo suurtogeli karto inaan ogolaano warqada ka imaaneyso iyaga.

*Haddii aadan haysan dokumintiyadaan, waxaa weli kuu suurtogaleyso inaad codsatid. Soo wac **211** wixii caawin ah.*

211
Get Connected. Get Help.™

RentHelpMN dhawaan ayay imaaneysaa. Fadlan ka fiiri **renthelpmn.org** ama ka soo wac **211** wixii warbixin la cusbooneysiiyay.

MINNESOTA

Waa xeerka Guriyenya Minnesota ee guriyeynta cadaalad dheeraad ah ee la raacsanyahay oo dhammaan barnaamijyadeena si markaas shaqsiyaadka heerarka daqliga la midka ah ay leeyihiin helitaan simman ee Barnaamijyada Guriyeynta Minnesota, iyada oo aan laga eegin jinsiyada, midibka, caqiidada, diinta, asalka dhalashada, jinsiyada, heerka guurka, heerka la xiriiro caawinta dadweynaha, curyaannimada, heerka qoyska, aqoonsiga jisniga ama dooqa galmada